



Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

U Gudbida Year 7 Dugsiga Dawlada ee NSW

Ka soo codso online si aad u bilowdid xiliga kala guurka ee ilmahaaga ka baxayo Year 6 ee gelayo Year 7.

Dugsiga xaafada ee ilmahaaga

Badiba Dugsiyada dawlada ee NSW waxay leeyihin goobo loogu talagalay oo ay ardey ka qaadan karaan si dhammaan carruurta da'da dugsiga gaadhay waxay xaq u yeelan doonaan inay tagaan dugsiga dawlada – dugsigooda xaafada.

Cinwaanka degaanka joogtada ah ee ilmahaaga ayaa go'aaminaya dugsiga ah ilmahaaga dugsigiisa xaafada. Aalada The School Finder (Dugsi Raadiyaha) ee education.nsw.gov.au/school-finder waxay kaa caawin karaan helida dugsiga xaafada.

Waalidiinta badidooda iyo xannaaneeyayaasha NSW waxay doortaan dugsigooda xaafada si ay u siiyan waxbarasho wanaagsan ilmahooda. Nidaamka isdiwaangelinta online ka ah ee wasaaradda wuxuu taageeraa u gudbida dusiga sare.

Dugsiyada xaafada waxay qaataan ardeyda dhammaan leh heerarka awoodeed, oo ay ku jiraan barnaamijyada loolanka ardeyda leh hibada iyo meel sare oo ay gaaraan iyadoo la siinayo waxbarasho dheeraad ah iyo taageerada baahidooda. Waxay sidoo kale bixiyaan nashaadka dheeraadka ah ee ka baxsan manhajka.

Waxaa jira kuleejoojin leh goobo fara badan oo ay ku jiraan tiro dugsiyo ah ama kambasyo oo dugsi kastaa ama kambas kastaa uu ku takhasusayo waxyaalo kala duwan. Tusaale, waxaa jira kambasyada hoose (Year 7-9 ama 7-10), kambasyada sare (Years 10-12 ama 11-12), waxbarasho ahaan ah kambasyo la xulay, kambasyada waxbarashada wiilasha iyo gabdhaha iyo kambasyada halka jinsi a leh.

Waxaa sidoo kale jira dugsiyo dhedhexaad ah oo bixiya jaaliyado badan oo baadiyaha degan oo gooni ah fursada ay wax ku bari lahaayeen carruurtooda laga bilaabo Kindergarten ilaa Year 12 oo hal dugsi ah. Dugsiyo badan oo dhedhexaad ah waxay isticmaalaan tignoolaji si ay isugu xiraan macalimiinta iyo ardeyda ku jirta dugsiyo kala duwan si maadooyin kala duwan loo bixiyo. Dugsiyada bartamaha sidoo kale waxay bixiyaan nashaad dheeraad ah oo ka baxsan manhajka oo guud.

Haddii aadan awoodin inaad online ka codsato ama aad doorbideysid inaadan sidaa sameyn, fadlan buuxi foomka adoo ka bilaabaya bogga 5-naad ee buug yarahen. Ku soo celi foomka oo buuxa dugsiga hoose/dhexe ee ilmahaaga.

Maclumaaad dheeraad ah waxaa laga helayaa
education.nsw.gov.au/public-schools/going-to-a-public-school/enrolment/high-school-enrolment



Fursadaha kale ee dugsiyada kale

Waxaa laga yaabaa inaad leedahay sababo aad ku jeelaan lahayd in ilmahaagu uu tago dugsiga aan ku ool xaafadaada.



Dugsiyada aan xaafada ku ool (ama goobta ka baxsan)

Dugsiyada leh goobaha loogu talagalay ee ay ardeyda ka qaataan waxay leeyihii xadka diiwaangelinta – tirada ardeyda ee laga diiwaangelin karo oo ku saleysan hoyga joogtada ah ee dugsiga. Xadka diiwaangelinta wuxuu noo sheegaya in dugsiga laga yaabo inuu aqbaloo ama uusan aqbalin diiwaangelinta aan xaafada ahayn. Xadka diiwaangelinta inta ah, dugsiyada qaarkood waxay dejyaan heer diiwaangelin si dhinac loogu saaro ardeyda xaafada ka imanaya inta lagu jiro sannadka.

Dugsiyada ka koreeya ama ku dhow heerkooda diiwaangelinta ma diiwaangelin doonaan ardeyda aan xaafada ahayn, ilaa ay jiraan xaalado laga soo reebayo mooyee.

Si kastaba ha ahaatee, dugsiyada leh boosas ka hooseeya heerkooda ilaalinta ardey qaadashada waxaa laga yaabaa inay aqbalaan ardey aan xaafada deganeyn.

Dugsiyada baahida diiwaangelinta ardeyda aan xaafada degenayn ay ka badan tahay tirada boosaska la helayo ee ka hooseeya heerka isku ilaalinta, dugsiyada waa inay sameeyaan shuruuda goobta diiwaangelinta oo ay sameeyaan guddi xulasho si ay u tixgeliyan codsiyada aan xaafada ahayn.

Dugsiyada takhasuska leh

Dugsiyada takhasuska leh waxay bixiyaan waxbarashada dugsiga sare oo xoogga saareysa awood khaas ah ama waxa ardeygu xiiseynayo. Dugsiyada takhasuska leh waxaa loo aasaasey hal abuur, jilida iyo fanka muuqaalka ah, luuqadaha, tignoolajiyada (oo ay ku jirto tignoolajiyada badda iyo tignoolajiyada miyiga) cayaaraaha iyo beeraha.

Qaar ka mid ah dugsiyadaan takhasuska leh shuruuda isdiiliwaangelinta waxaa laga yaabaa inay ka mid tahay jillida ama dhageysiga.

Fasalada taageerada

Qaar ka mid ah dugsiyada sare ayaa waxay leeyihii fasalo taageero oo loogu talagalay baahida waxbarashada iyo taageerada dheeraadka ah ee ardeyda iinta leh. Ilmahaaga maamulihiisa dugsiga hoose dhexe ayaa kaa caawin doona inaad u hesho fursada dugsi ee saxda ah ilmahaaga, adoo tixgelinaya doorashadaada, ilmahaaga baahidiisa khaaska ah ee dheeraadka ah iyo intuu u jiro adeegyada takhasuska leh ee xaafada.

Tixgelinta ku meelaynta fasalka taageerada waxaa lagu maamulaa nidaamka ku meeleynta.

Waxbarasho ahaan dugsiyada xulka ah

Nidaamka codsiga ee gelitaanka dugsiga waxbarasho ahaan dhammaan xulka ah ama qayb ahaan wuxuu bilowdaa marka ardeygu ku jiro Year 5 wuuna ka dheer yahay nidaamka diiwaangelinta caadiga ah.

Foomka codsiga waxaa laga helayaa oo kaliya Interneetka. Fadlan ogow inaan la aqballi doonin.

Liiska dugsiyada waxbarasho ahaan xulka ah iyo faahfaahinta nidaamkooda isdiiliwaangelinta waxaa laga helayaa: <https://education.nsw.gov.au/public-schools/selective-high-schools-and-opportunity-classes>

Xarumaha Ingiriiska Degdega ah

Isticmaal aalada Dugi Raadinta ee: <https://education.nsw.gov.au/school-finder> si loo helo dugsiyada sare ee bixiya taageerada Ingiriiska Degdega ah.

Geli ciinwaanka gurigaaga ama Boosta koodhka si aad u raadisid khariirada dugsiga xaafadaada oo dooro batoonka Intensive English Centre ee "Nearby schools".

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir maamulaha dugsiga hoose dhexe ee xaafadaada ama dugsiga sare ee aad doorato.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada fadlan ka wac **Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450** kuna weydiiso turjumaan luuqadaada. Adeeggan wuxuu kuu ahaanayaa lacag la'aan adiga.

Buuxinta Muujinta inaad Daneynayo

Waxaad tilmaami kartaa dugsigaad jeelaan lahayd in ilmahaagu dhigto adoo buuxinaya foomka Muujinta Dareynayta ee dugsigaaga xaafada iyo/ama ugu badnaan 3 ka mid ah goobaha dugsiyada ka baxsan.

Waxaa jira saddex tallaabo oo aad ilmahaaga ugu diwaangelinaysid Year 7:

Tallaabo 1: Buuxi Muujinta Daneynta si aad u cadsato in lagugu meeleyyo dugsiga/yada dawlada ee aad doorato.

Foomkan waa inay waalidiintu iyo xannaaneeyayaashu dhammaan ardeydu ku buuxiyaan Ingiriis iyagoo cadsanaya ku meelaynta Year 7 ee dugsiga dawlada NSW ee sannadka dambe.

Ardyada hadda ka diiwaangashan dugsiyada hoose/dhexe ee Dawlada NSW waxaad ku dhammeystiri kartaa daneyntaada online ama buuxi foomka warqada ah ee ku lifaaqan oo ku soo celi dugsiga hoose/dhexe ee ilmahaaga. Ardyada aan hadda ka diiwaangashaneyn dugsiga hoose/dhexe ee Dawlada NSW, waxaad ku buuxin kartaa daneyntaada online ama ku soo celi foomkan dugsiga sare ee Dawlada NSW ee aad dooneysid inaad ilmahaaga ka diiwaangelisid.

Dhammaan Muujinta Daneynta waa in la soo celiyaa taariikhda la rabo ama ka hor.

Tallaabada 2: Buuxi cadsiga isdiiwaangelinta

Islamarka ilmahaaga boos laga siyo dugsi, waxaa lagu weydiin doonaa inaad buuxiso **Codsiga isdiiwaangelinta dugsiga dawlada ee NSW**. Kan waxaa laguu soo diri doonaa inta lagu jiro Teeramka 2-aad ama Teeramka 3-aad.

Codsiga waxaa lagu buuxin karaa online ama adoo buuxinaya foomka warqada ah ee laguu soo diri doono inta lagu jiro Teeramka 2aad ama Teeramka 3aad

Fadlan buuxi dhammaan faahfaahinta foomka una soo celi sida ugu dhakhsaha badan.

Go'aanka ugu danbeeya ee isdiiwaangelinta waxaa la sameyn doonaa iyadoo la raacayo tixgelinta iyo aqbalada cadsigaaga isdiiwaangelinta ee maamulaha dugsiga. Maamuluu waxaa laga yaabaa inuu kuula soo xiriir macluumaad dheeraad ah.

Waxaad heli doontaa iimeyl ama warqad haddii ilmahaaga loo aqbalay isdiiwaangelin amase aan la aqbalin.

Tallaabo 3: Baro dugsigaaga cusub

Maarkaad hesho xaqijinta ilmahaaga isdiiwaangelintisa, waa muhiim inaad wax ka barato dugsiga cusub si aad u taageerto u gudbida ilmahaaga Year 7.

Dugsigu wuxuu u sameyn doonaa maalin nashaad u gudbid iyo wacyi gelin ardeyda bilaabi doonta Year 7 sannadka soo socda. Xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta badanaa waa lagu martiqadaa maalintan wacyi gelinta ah, oo la qabto dhammaadka Nofeembar/ horaanta Diiseembar. Waxay ka caawineysaa ilmahaaga inuu wax ka ogaado maadooyinka iyo casharada dugsiga sare, macalimiinta, fasalada iyo nidaamka dugsiga iyo siinta ardeyda fursad ay kula kulmaan ardeyda kale.

Waa lagu soo wargelinaya taariikhda maalinta wacyigelinta dugsigaaga cusub, iyo macluumaadka ku saabsan dharka dugsiga, fursadaha safarka iyo faahfaahinta kale ee muhiimka ah.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha. Haddii aad u baahan tahay turjumaan adiga ku caawiya, fadlan wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo weydiso turjumaan. Xiriiriyaha ayaa kuu soo gelin doonaa khadka turjumaan kaa caawiya hadalkaaga. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Macluumaad caawin doona dugsigaaga cusub wuxuu siinaya ilmahaaga taageero iyo waxbarasho.

Waa muhiim inaad siiso dugsigaaga cusub macluumaad ku saabsan taageerada baahida iyo waxbarashada ilmahaaga. Waa muhiim inaad u sheegto dugsiga wax ku saabsan wixii xasaasiyad ah ee aan la aqoon ama xaaladaha kale ee caafimaad ee la xiriir ilmahaaga.

Tan waxaa ka mid ah laakiinse kuma xaddidna macluumaadku ilmahaaga lagu sheegay anaphylaxis, nefta, sonkorta ama qalalka.

Haddii ilmahaaga lagu sheegay inuu khatar ugu jiro anaphylaxis fadlan sii ilmahaaga dugsigiisa cusub ASCIA Action Plan for Anaphylaxis ee hadda oo uu dhammeystiray saxiixayna dhakhtarka ilmahaagu.

Oo ay la jirto ASCIA Action Plan dugsigu wuxuu u baahan doonaa adrenaline autoinjector si uu u taageero jawaabta caafimaadka degdega ah ee ku faahfaahsan qorshaha. Fadlan ogow taariikhda dhicitaanka ee ku taal adrenaline autoinjector ee dugsiga la siiyey oo sii qalabka bedelaada ah wakhtiga ka hor.

Macluumaad kaa caawinaya inaad buuxisid xiiso inaad u qabto

Qaybta A

Fadlan buuxi faahfaahinta shakhsiyeed ee ilmahaaga oo buuxi Qaybta caddeynta A.

Qaybta B

Qaybta B waxay ku tuseysaa magaca dugsiga xaafadaada loogu talagalay, oo ku saleysan cinwaanka guriga ilmahaaga. Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay in lagu meeleyyo dugsiga xaafadaada.

Haddii aad ka raadineysid meeleyen kaliya dugsiga xaafadaada fadlan saxiix **Qaybta B**, kuna soo celi foomka taariikhda loogu talagalay. Hadda waxaad buuxisay foomka.

Haddii aad cadsatay dugsiga xulashada ee waxbarasho, oo aad dooneysid in ilmahaagu inuu dhigto dugsiga xaafada haddii uusan ku guuleysan, sidoo kale saxiix oo taariikhhee **Qaybta B**.

Qaybta C

Haddii aad raadineysid meeleyno kale fadlan ugu liisgaree ilaa saddex dugsi sidaad u kala door bideyso **Qaybta C**.

Waxaad ka codsan kartaa meelaynta:

- dugsi takhasusle ah
- fasal taageero ah (adoo la tashanaya maamulaha) dugsigaaga hoose dhexe, oo gudbin doona arjiga adoo codsanaya nooca fasalka taageero
- dugsiga aan ku oolin xaafada.

Fadlan ogow in dugsiyada takhasuska leh, iyo guddiga meelaynta ee isdiiwaangelinta dugsiyada aan xaafada ku oolin ay yeelan doonaan shuruudo codsi oo dheeraad ah.

Haddii aadan hubin inaad u baahan tahay buuxinta foomam dheeraad ah, fadlan la samee xiriir toos ah dugsiga aad xiiseynayo.

Waxaa jirta tallaabo dheeraad ah haddii aad codsaneysid meelaynta dugsi aan xaafadaada ku oolin.

Dugsiyadu waxay leeyihiin shuruuda meelaynta ee diiwaangelinta xaafada uusan ku oolin meesha baahida diiwaangelinta aan xaafada aan ku oolin ka badato tirada inta boos ee la helayo kana hooseysa diiwaangelinta.

Haddii aad ka raadineysid boos dugsi aan xaafada ku oolin, fadlan bixi sababaha aad u dooneysid meelaynta aan xaafada ahayn, tusaasle:

- wallaalaha hadda ka diiwaangashan dugsiga
- udhowaanta iyo helitaanka dugsiga
- helitaanka dugsiga halka jinsi dhigto
- sababta daawada
- ammaanka iyo kormeerka ilmahaaga dugsiga ka hor iyo ka dib
- helitaanka maadooyinka ama isu geynta
- xaaladaha naxariista
- qaabka iyo habka dugsiga
- isbedelada dhowaa ee xadadka goobta xaafada ardeyda laga qaato.

Guddiga diiwaangelinta dugsiga waxay tixgelin doonaan macluumaadka foomkan oo kaliya iyo wixii dukumiinti kale ah ee aad keento.

Haddii ilmahaaga aan boos laga siin dugsiga Doorashadiisa 1 ah, ilmahaaga waxaa loo tixgelinayaa ku meelaynta dugsiga. Doorashadaada 2, ka dib Doorashadaada 3, haddii ay khuseyso.

Haddii aadan ku guuleysan ka helitaanka boos mid ka mid ah doorashooyinkaaga, dugsigu wuu ku soo ogeysiin doonaa adiga. Waxaa laga yaabaa inuu dugsi tilmaamo in lagu geliyey liiska sugitaanka iyo in lagu siin doono boos haddii mid la helo.

Haddii ilmahaaga laga siiyo boos mid ka mid ah dugsiyada kuu liisgareysan ee aad doorbideyso, kama heli doontid boos dugsi kale oo ka hooseeya doorbididaada.

Haddii aan wax boos ah laga helin dugsiyadaad soo codsatay midkoodna, ilmahaaga wuxuu boos ka helayaa dugsiga xaafada ee ku diiwaangashan **Qaybta B**, oo ku xiran aqbilaada codsigaaga inaad iska diiwaangeliso dugsigaas.

Haddii aad dareemayo inaan si fiican laguula dhaqmin ama in natijjadu aysan macquul ahayn, waxaa laga yaabaa inaad soo xareyso racfaan. Racfaanka waa in lagu sameeyaa qoraal ku socda maamulaha dugsiga sare.

Qaybta D

Haddii aad dalbatay dugsi waxbarasho ee xul ah fadlan sax sanduuqa **Qaybta D** ee foomkan oo buuxi **Qaybta B, C** ama **Qaybta E** haddii ay dhacdo in ilmahaagu uusan ku guulaysan inuu boos ka helo dugsiga xulka ah.

Qaybta E

Haddii aadan uga baahneyn boos dugsiga dawlada fadlan buuxi Qaybta E.

Buuxinta **Qaybta E** waxay xireysaa dhammaan falka dugsiyada dawlada ee NSW ee la xiriira ku meelaynta ilmahaaga Year 7.



Mujinta Daneynta (Expression of Interest)

Ku meelanya Year 7 ee dugsiga dawlada NSW.

Placement in Year 7 in a NSW Government school.

Fadlan ku buuxi foomkan Ingiriis

SRN

--	--	--	--	--	--	--	--	--

Xafiiska kaliya ayaa isticmaalaya (waalidka/xannaaneeyayaasha ha buuxinina) (Office use only)

A. Macluumaadka ardeyga (A. Student information)

Magaca qoyska

Family name

Magaca koowaad

First given name

Middle (kale) magac/magacyo

Middle (other) name/s

Sinjiga
Gender

Lab
Male

Dhedig
Female

Taariikhda dhalashada
Date of birth

		/			/			
--	--	---	--	--	---	--	--	--

Maalinta

Bisha

Sannadka

Cinwaanka degenaanshaha (tusaale 1 High Street, Sydney, NSW, 2000) (Residential address)

--	--

Magaca waalidka/xannaaneeyaha
Name of parent/carer

Lambarka taleefanka (taleefanka gacanta)
Phone number (mobile)

Lambarka taleefanka (shaqada)
Phone number (work)

Lambarka taleefanka (guriga)
Phone number (home)

Cinwaanka limeylka
Email address

Dugsiga hoose dhixe ardayga ee hadda (Student's current primary school)

--

Caddeyn (Declaration)

Waxaan caddeynayaa in macluumaadka aan ku bixiyey *Mujinta Daneynta* ay tahay, intaan rumeysanahay aqoontayduna gaarsiisan tahay, mid sax ah oo dhammeystiran. Wuxaan garowsanahay, qoraalada codsigani haddii ay dib ka noqdaan kuwo been ah ama wax jahwareerinaya, wixii go'aan ah ee la gaaray codsigan dartii waxaa laga yaabaa in la bedelo. Wuxaan fahamsan ahay in isdiilaangelin kasta ee la socota meelayntan inay hoos imanayso tixgelinta iyo aqbalaada *Codsiga aad isaga diiwaangelinayo dugsiga Dawlada NSW* (*Application to Enrol in a NSW Government School*).

Saxiixa waalidka/xannaaneeyaha (Signature of parent/carer)

Magaca qor (Print name)

--

--

Taariikhda
Date

		/			/			
--	--	---	--	--	---	--	--	--

Maalinta

Bisha

Sannadka

B. Meelanya dugsiga dawlada ee xaafadaada (B. Placement at local government school)

Dugsiga xaafadaada (Your local school)

Fadlan saxiix qaybtan hoose haddii aad dooneysid in ilmahaagu uu dhigto dugsiga dawlada ee xaafadaada loo qoondeeyey.

Saxiixa waalidka/xannaaneeyaha (Signature of parent/carer)

--

Taariikhda
Date

		/			/			
--	--	---	--	--	---	--	--	--

Maalinta

Bisha

Sannadka

Haddii aad kor soo saxiiday oo aad dooneysid in ilmahaagu uu tago oo **kaliya** dugsigan, hadda waad dhammeystirtay foomkan.

Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

C. Tixgelinta waxaa la siin doonaa meelaynta dugsiyada kale ee dawlada C. Consideration to be given to placement at other government schools

Haddii aad doorbideysid in ilmahaagu dhigto dugsi aan xaafada ku ool, waxaad sheegi kartaa ugu badnaan saddexda dugsi ee aad doorbideyso. Waxaa laga yaabaa inaad ku darto:

- **Dugsiga dawlada ee takhasus.** Fadlan ogsoonow in lagugu dhiirigelinayey inaad ka raasido caawimaad ka timid maamulaha dugsiga hoose/dhexe haddii aad dooneysid in ilmahaaga loo tixgeliyo meelayn dugsiga takhasus leh.
- Dugsiga leh **fasallo taageero** oo loogu talagalay ardeyda leh baahiyaha taageero iyo waxbarashada dheeraadka ah. Fadlan ogsoonow in tani ay mareyo guddiga meelaynta. **Waa inaad caawimaad ka raadsataa maamulaha dugsiga hoose/dhexe haddii aad dooneysid in ilmahaagu loo tixgeliyo ku meelaynta fasalka taageerada.**
- **Dugsiyada kale ee aan dawliga ahayn.** Fadlan dul mar sababahaaga aad ku raadinayo meelayn-ta/naha xaggaa hoose ee boggaa (iyo bogga 7-aad haddii loo baahdo).

Waxaan jeelaan lahaa inaan u raadiyo meelayn ilmaheyga dugsiyada dawlada ee soo socda:

Doorashada 1 dugsi

Choice 1 school

Doorashada 2 dugsi

Choice 2 school

Doorashada 3 dugsi

Choice 3 school

Waxaan fahamsan ahay in haddii ilmaheygu uusan ku guulaysan meelaynta mid ka mid ah dugsiyada kore , isaga/iyadu waxaa lagu meelayn doonaa dugsiga loo qoondeeyey ee xaafada ee ku taxan Qaybta B.

Saxiixa waalidka/xannaaneeyaha (Signature of parent/carer)

Taariikhda
Date

<input type="text"/>	<input type="text"/>	/	<input type="text"/>	<input type="text"/>	/	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>
----------------------	----------------------	---	----------------------	----------------------	---	----------------------	----------------------	----------------------	----------------------

Maalinta Bisha

Sannadka

Maamulaha dugsiga hoose dhexe oo kaliya ayaa isticmaalaya (Primary school principal use only)

Primary school principals may wish to include comments to assist secondary school principals make placement decisions. These comments should refer to the reasons given by parents and carers.

Signature of primary school principal

Date

<input type="text"/>	<input type="text"/>	/	<input type="text"/>	<input type="text"/>	/	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>
----------------------	----------------------	---	----------------------	----------------------	---	----------------------	----------------------	----------------------	----------------------

day

month

year

Buuxi oo kaliya macluumaadka hoose haddii aad codsaneysid meelaynta dugsiyada aan xaafadaada ku ool. Uma baahnid inaad buuxisid qaybtan haddii aad codsaneysid dugsiyada takhasuska leh, ama fasalada taageerada. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxaa laga yaabaa inaad ku soo lifaaqdo macluumaad dheeraad ah oo taageeraya codsigaaga meelaynta ee dugsiga aan xaafada ku ool. Tixraac boggaga 2 iyo 3 wixii macluumaad dheeraad ah.

Magaca dugsiga Doorashada 1

Name of Choice 1 school

Fadlan dulmar sababahaaga aad ku dooneysid ku meelaynta dugsigan (tixraac shuruuda diiwaangelinta khaaska ah ee dugsiga).

Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

C. (waa socotaa) C. (continued)

Magaca dugsiga Doorashada 2
Name of Choice 2 school

Fadlan dulmar sababahaaga aad ku dooneysid ku meelaynta dugsigan (tixraac shuruuda diiwaangelinta khaaska ah ee dugsiga).

Magaca dugsiga Doorasha 3
Name of Choice 3 school

Fadlan dulmar sababahaaga aad ku dooneysid ku meelaynta dugsigan (tixraac shuruuda diiwaangelinta khaaska ah ee dugsiga).

D. Dugsiga xulashada waxbarasho ahaan (D. Academically selective school)

Waaan u gudbiyey codsiga meelaynta dugsiga xulashada waxbarashada. Ilmaheygu wuxuu u fariisan doonaa imtixaanka Dugsiga Sare ee Xulashada.
I have submitted an application for placement in an academically selective school. My child will be sitting for the Selective High Schools test.

Lacala haddii uusan ilmahaagu ku guulaysan inuu ka helo meal dugsigan/dugsiyadan, fadlan sidoo kale buuxi Qayba B, Qayba C ama Qayba E ee foomkan.

E. Meelayn looma baahna (E. Placement not required)

Waaan xaqiijinayaan ilmahaygu uusan meelayn ka dooneyn dugsiga Dawlada NSW sannadka soo socda. Waan akhriyey oo fahmay macluumaadka ku saabsan soo gudbintaan oo ay ku jiraan ururinta macluumaadka shakhsiyed. Ilmaheygu wuxuu dhigan doonaa dugsiga soo socda.*

I confirm that my child will not be seeking placement at a NSW Government school next year. I have read and understood the information about this submission including the collection of personal information. My child will be attending the following school.*

--

Saxiixa waalidka/xannaaneeyaha (Signature of parent/carer)

--

Taariikhda
Date

/ /
Maalinta Bisha Sannadka

*Bixinta macluumaadkan loo baahna laakiinse waa lagu faraxayaa.

Qoraalka Gaarka ah (Privacy Statement)

Macluumaadka shakhsiyeed ee lagu bixiyey foomkan ciwankiisu yahay **Soogudbinta Daneyntaada – Ku meelaynta**.
Fasalka 7 dugsiga Dawlada NSW waa la ururinayaan iyadoo ujeedadu tahay xiriirinta codsiyada diiwaangelinta Year 7 ee dugsiyada Dawlada NSW. Wixii macluumaad ah ee la siyo NSW Department of Education (**the Department**) waa la isticmaali doonaa, la bixin doonaa loona keydin doonaa si waafaqsan shuruucda arimaha gaarka ah ee NSW.

Macluumaadka qaarkii waxaa u baahan **the Department** si ay u fuliso waajibaadkeeda daryeel iyo waalibaadkeeda kale ee sharci iyo hawlaho hoos yimaada waxbarashada, caafimaadka dadweynaha iyo sharciga ilaaliinta ilmaha (child protection) iyo shuruudaha ka sooo warbixinta ee dawlada dhexe-heshiisyyada maalgelinta Dawlad Goboleedka. Tan waxaa laga yaabaa inay ku lug leedahay natiijooyinka qiiimeyinku ardayga iyo la socodaka.

Waxaa laga yaabaa in macluumaadka in siyo wakaaladaha dawlada Dhexe iyo Gobolka NSW iyo ururada kale ee ujeedooyinka kare iyo sida uu rabo ama idmay sharcigu.

Macluumaadka waxaa lagu kaydin doonaa kayd-haye elektaroonig amaan ah. Waxaa laga yaabaa inaad hesho ama saxdid macluumaadka adoo la xiriiraya dugsiga ilmahaaga. Haddii aad wax cabasho ah ama su'aalo ah ka qabtid ama sidii loo isticmaalay ama loo bixiyey, waa inaad la xiriirtaa dugsiga.

Haddii aad doorato inaadan bixin qaar ka mid ah macluumaadka lagaa codsaday inay saameyso ilmahaaga diiwaangelintisa, agab u sameynta dugsiga ama fulinta baahida waxbarasho ee ilmahaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka ururinta macluumaad ilmahaaga inta ilmahaagu uu ka diiwaangashan yahay dugsiga Dawlada NSW, iyo sidaan u ilaaliino arimahaaga gaarka ah, waxaa laga helayaa website ka Department ama dugsigaaga. Waxaad ka heli kartaa nuqul ka Ogeysiiska Ururinta Macluumaadka gaarka ah ee Department. <https://education.nsw.gov.au/content/dam/main-education/about-us/rights-and-accountability/media/documents/privacy/collection-notice.pdf>

Ardeyda hadda dhigata dugsiyada hoose dhexe ee dawlada, fadlan ku soo celi foomkan dugsiga hoose dhexe ee ilmaha. Ardeyda aan ka diiwaangashaneyn dugsiyada hoose dhexe ee dawlada, fadlan ku soo celi foomkan dugsiga sare ee dawlada kaas oo ah doorashadaada koowaad ee isdiawaangelinta.

Dhammaan Muujinta Daneynta waa in la soo celiyaa taariikhda la rabo ama ka hor.



Waxaan aqoonsanahay dhulka hooyo ee dhammaan dadka Aboorujinka ah waxaana siinaa xushmadeena Dalka.

Say hello

-  @NSWDepartmentofEducation
 -  @NSWEducation
 -  @NSWEducation
- education.nsw.gov.au

© 2023 NSW Department of Education

GPO Box 33, Sydney NSW 2001 Australia

Phone: 1300 679 332

